

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA  
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA  
ARRIMAHA SHARCIGA EE TAYO  
MUQDISHO - SOOMAALIYA



جمهورية الصومال الفدرالية  
مكتب تيو لتوثيق العقود  
والإستشارات الشرعية  
مقديشوا - الصومال

SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADDA  
(SHIRKADA DHULALKA IYO GURYAHA EE DAACAD)

MUQDISHO-SOOMAALIYA

2022



+252 612223788 | +252 615353330



Nootaayotayo@gmail.com



Barako Market , Near Waaheen Hotel Mogadishu, Somalia

**UJEEDDO: DHISMO SHIRKAD MAS'UULIYADEEDU XADIDDAN TAHAY OO  
LAGU MAGACAABO (DAACAD).**

Maanta oo ay taariikhdu tahay **05/11/2022** Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed (Max'ed Notaayo)**, lehna Xafiiska Nootaayaha Tayo Public Notary ee ku yaalla Xamar, degmada H/Wadaag Xafiisna ku leh Waddada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Dambe ee Hotel Waaheen ee Magaalada Muqdisho, waxaa xafiiska iigu yimid mudanaha Hoos Ku Xusan:-

**1-Cilmi Geedi Toxow**, Sita baasaboorka lamarkiisu yahay P00965814, kuna lifaaqan Dukumintigaan. Lehna Warqada Shatiga Ganacsiga No:-393535, Kana Soo Baxday D/Hoose Ee Muqdisho.

Mudanahaaan Isago caafimaad qaba, caqligiisuna taam yahay, cid heshiiskaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, Wuxuu i weediisteen inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci Shirkadeed oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

**QODOBKA 1-AAD  
MAGACA SHIRKADDA**

Mudanaha aan kor ku soo sheegay wuxuu sameystay Sharci Shirkada lagu magacaabo **(SHIRKADDA DHULALKA IYO GURYAHA EE DAACAD)** oo ah Shirkad gaar loo leeyahay (Private Company).

**QODOBKA 2-AAD  
ASTAANTA SHIRKADDA**



**QODOBKA 3-AAD**

**WAQTIGA LA' AASAASAY SHIRKADDA**

SHIRKADDA DHULALKA IYO GURYAHA EE DAACAD waxaa la'aasaasay **26-10-20213**, waxaana lagu aasaasay magaalada Muqdisho caasimadda Soomaaliya.

**QODOBKA 4-AAD  
NOOCA SHIRKADDA**

Shirkaddani waa Shirkad gaar loo leeyahay, waxaana ku soo biiri Kara Saamiley kadib markuu Saxiixo Maamulaha Guud ee shirkadda.

**QODOBKA 5-AAD**  
**XARUNTA SHIRKADDA**

Xarunta Shirkadda waa Muqdishu caasimadda Soomaaliya Degmada H/wadaag, Xarumaha, Shirkadda waa la kordhin karaa markii loo baahdo waxaana lagala xiriirayaa maamulaha guud ee Shirkadda.

**QODOBKA 6-AAD**  
**UJEEDDOOYINKA SHIRKADDA**

- 1-ka ganacsiga Dhulalka, iyo Guryaha.
- 2-Dhisidda, Dayactirka, iyo Kireynta Guryaha.
- 3-Sharciiyeynta Goofafka.
- 4-Qiimeynta Dhulalka iyo Guryaha.
- 5-Gelidda Heshiiyada Ganacsiga ee Dowliga ah iyo kuwa aan Dowliga ahayn.
- 6-Hormarinta iyo sare u qaadidda ilaha dhaqaale ee Dalka.
- 7-Shaqo u Abuuridda Dhalinyarada Soomaaliyeed.

**QODOBKA 7-AAD**  
**RAASUMAALKA SHIRKADDA**

Raasumaalka shirkaddu waa lacag dhan US \$200,000 ( Labo Boqol kun oo doolarka Mareykanka ah)

| No. | Magaca Milkiilaha  | Lacagta    | Boqoley |
|-----|--------------------|------------|---------|
| 1   | Cilmi Geedi Tooxow | \$ 200,000 | 100 %   |

**QODOBKA 8-AAD**  
**KAMID NOQOSHADA SAAMILEYDA SHIRKADDA**

Qof walba oo ku darsada saami xadidan shirkadda buuxiyena xeerka kamid noqoshada saamileyda, uuna u saxiixo maamulaha guud ee shirkaddu, wuxuu noqonayaa saamile ka diiwaan gashan shirkadda.

**QODOBKA 9-AAD**  
**QAYBSASHADA FAA'IIDADA IYO KHASAARAHA**

Faa'iidado iyo khasaaro wixii yimaado waxaa iska leh dhamaan Milkiilaha shirkadda

**QODOBKA 10-AAD**  
**SHAKHSIYADDA QAANUUNIGA EE SHIRKADDA**

Shirkaddu waxa ay leedahay xuquuq qaanuuni ah, haddaba Magaca Shirkadda ayaa loo isticmaalayaa dhammaan hantida Shirkadda sida: heshiisyada, gaadiidka, qalabka, dhulalka, guryaha, sumadaha ganacsiga iyo tiimbarayaasha.

## QODOBKA 11-AAD

### QAAB DHISMEEDKA IYO MAAMULKA SHIRKADDA

Cilmi Geedi Tooxow

*Maamulaha Guud iyo Milkiilaha Shirkadda*

## QODOBKA 12-AAD

### AWOODAHA MILKIILAHA SHIRKADDA

#### Awoodaha Milkiilaha Guud ee Shirkadda.

- 1-Waa matalaha Shirkadda ee dhammaan heshiisyada ay shirkaddu galayso.
- 2-Wuxuu siin karaa wakaalad guud ama mid gaar ah Cida uu Doono.
- 3-Waa saxiixaha foomka kamid noqoshada Shirkadda
- 4-Dabagalka iyo kormeeridda dhammaan shaqooyinka shirkadda
- 5-Wuxuu maamulayaa akoonada shirkadda ee ka furan bankigayada
- 6-Wuxuuna Lacag Ka Bixin Kara Akoonada Bankiyada Ee Magaca Shirkada Ku Qoran
- 7-Wuxuuna iibin kara Dhulalka Magaca Shirkada Ku Qoran
- 8-Diiwaan galinta xisaabaadka shirkadda
- 9-Samaynta xisaab xir sanadeedka shirkadda
- 10-Socodsiinta guud ahaan shaqada shirkadda
- 11-waa madaxa shaqada iyo shaqaalaha shirkadda
- 12-Wuxuu Shirkadiisa Ku Soo Biirin Karaa Wax kasta oo Sharci ah uu u arko in ay faa'iido u leeyihiin shirkaddiisa.

## QODOBKA 13-AAD

### GEERI AMA WAALLI KU TIMAADDA MILKIILAHA

Haddii waalli ama geeri ku timaado milkiilaha shirkadda waxaa saamigiisa lagu wareejinayaa dhaxaltooyadiisa sharciga ah ama ciddii kale ee maxkamadu u amarto.

## QODOBKA 14-AAD

### MUDDADA JIRITAANKA SHIRKADDA

Shirkadda dhulalka iyo guryaha ee daacad waxay jiraysa muddo dhan 60 sano, mudada jiritaanka Shirkadda wa la kordhin karaa haddii uu ogolaado milkiilaha Shirkadda waana layareyn karaa.

## QODOBKA 15-AAD

### BAABI'INTA SHIRKADDA

Waxaa uu baaba'ayaa Shirkadda dhulalka iyo guryaha ee daacad marka la helo qodobada soo socdo:-

1. Dhamaanshaha muddada jiritaanka shirkadda.
2. Go'aan baabi'in ee ka soo baxo Milkiilaha.
3. Haddii Shirkadda ay musalafto Islamarkaana ay u suurta gali weyso in ay shaqeeyso.
4. Haddii uu soo baxo sharci baabinayo Shirkadda noocaan ah.



+252 612223788 | +252 615353330



Nootaayotayo@gmail.com



Barako Market , Near Waaheen Hotel Mogadishu, Somalia

**QODOBKA 16-AAD**

**KALA QAYBSIGA HANTIDA SHIRKADDA**

Waxa la magacaabayaa guddi farsamo oo soo aruuriya hantida Shirkadda ee deynta ku maqan iyo midda taala, isla markaasna la bixiyo xuquuqda lagu leeyahay Shirkadda iyadoo lagu saleynaayo xeerka iyo shuruucda lagu dhisay Shirkadda.

**QODOBKA 17-AAD**


**WIXII LAGA WAAYO SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADDA.**

Wixii aan ku qornayn sharciga dhismaha Shirkadda waxaa loo raacayaa xeerka shirkadda iyo sharciga Shirkadda ee dalka u degsan.

**QODOBKA 18-AAD**

**DHAQAN GALKA SHARCIGA DHISMAHA**

Sharciga dhismaha wuxuu dhaqangelayaa marka uu Saxiixo Milkiilaha Shirkadda, Wuxuuna heshiiskan Ku saxiixay Xafiiska, kadib markii uu akhristay, uuna raalina ka noqday sida aan u qoray heshiiskan, waana kan saxiixisa hoos ku cad:-

| No. | Magaca             | Saxiixa  |
|-----|--------------------|--|
| 1   | Cilmi Geedi Tooxow |  |

**QODOBKA 19-AAD**

**TIRADDA BOGAGGA IYO QODOBADA HESHIISKAAN KA KOOBANAYAHAY**

heshiiskan wuxuu ka koobanyahay 19-qodob iyo 5-bog.

**( XAFIISKA NOOTAAYAHA )**

REP.406/TPN/2022 Tr.05/11/2022, Muqdisho, Aniga oo ah:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed “Max’ed Notaayo”** lehna Xafiiska Nootaayaha Tayo, Waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Shirkadda ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, islamarkaana uuna Saxiixay Milkiilaha Shirkadda Nootaayaduna waxey hubisay magaciisa in uu yahay Kii dhabta ahaa uuna leeyihiin saxiixa kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

**SAXIIXA NOOTAAYAHA**

**Dr. Maxamed C/laahi Maxamed “Max’ed Notaayo”**



393535

LAMBAR BOONADA 001-0000064849

LACAGTA: 100.00



**DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO  
MUNICIPALITY OF MOGADISHU  
SHATIGA GANACSIGA**

**Business Permit**

**TAARIIKH / Date 12-Dec-2021**

**SHATIGAN WAXAA LA SIIYEY**

This permit is hereby granted to

**SHIRKADDA DHULALKA IYO GURYAHA EE DAACAD**

MAGACA GANACSIGA (Trade name)

**CILMI GEEDI TOXOW**

MAGACA MILKIILAHA / MAAMULAHA (Name of Owner / Manager)

**WAXAA LOO OGOLAADAY OO KALIYA GANACSIGA HOOS KU XUSAN:**

To operate and engage in the businesses of:

**KIREYNTA GURYAHA IYO IIBINTA**

SHATIGAN WAXA LOO OGOL YAHAY OO

KALIYA CINWAANKA GOOBTA HOOS KU XUSAN

Business under this permit shall exclusively be

Conducted at the address indicated below:

|                    |            |            |             |
|--------------------|------------|------------|-------------|
| Degmada/Deegaanka: | Howlwadaag | WAAXDA:    | Xaawo Taako |
| LAANTA:            | N/A        | TABEELAHA: | N/A         |

SHATIGAN WAXA UU DHACAYAA

This permit expires on the 12-Dec-2022

*Hadii aadan ka run sheegin macluumaadka aad bixisay, ogsoonow in Shatiga dib lagaala noqon doono iyadoo Waliba sharciga lagula tiigsan doono.*



**Duqa Magaalada ee Muqdisho  
Mayor of Mogadishu**

**CUMAR MAXAMUUD MAXAMED**

*Cumar Maxamuud Maxamed*

**KOMBUYUUTAR SHATI  
LAMBAR/Computer SerialNo.  
42441**




**FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA**

**Tr. 09/11/2022**

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed Siyaad** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/waduud Cilmi Geedi** oo ka Wakiil ah Loo Caddeeye Cilmi Geedi “ **Shirkadda Dhulalka iyo Guryaha ee Daacad** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 406/W.P.N/22, Tr. 05/11/2022**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

|                              |  |
|------------------------------|--|
| <b>Magaca Loo Caddeeyaha</b> | Shirkadda Dhulalka iyo Guryaha ee Daacad |
| <b>Taariikhda Caddeynta</b>  | 05/11/2022                               |

**CADEEYE:** Aniga oo ah **C/waduud Cilmi Geedi**, Leh Tel No. **0619013740**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **Shirkadda Dhulalka iyo Guryaha ee Daacad**.



**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Dr. Maxamed C/laahi Maxamed Siyaad**

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**C/waduud Cilmi Geedi**